

CAAWIYEYAASHA MIRA DHALKA GEEDAHA

Caawiyeyaasha mira dhalka geedaha waa noocyo xayawaano ah sida shinnida, balambaalista, shimbiraha hummingbirds, cayayaanka moths loo yaqaano, iyo kibileyda oo faafiya iniinaha ubaxa ama miraha dhaliya ee geedaha labka ah geeyana ilaa qeybaha taranka ee geedo dhaddig ah ama qeyb dheddig ah oo isla hal geed ka tirsan haddii uu labo qeybood oo midna lab tahay midna dheddig tahay geedku leeyahay. Waxay ugu tiirsan yihiin geedaha cunno, sida iniinaha geedka ee labka ah, dhacaanka macaan ee ubaxa, miraha ama khudaarta macaan, naats-ka ama waxyaabaha lawska ueg, iyo miraha. Marka ay goosanayaan cuntadooda, noocyadani waxay fududeeyaan in iniinaha taranka ee labka ah ay galaan qeybaha dheddiga ah taasoo keenta geeduhu inay rimaan ayna soo saaraan khudaar macaan iyo tan la karsado ayna tarmaan. Hannaanka galinta iniinaha taranka ee labka qeybaha dheddiga ah waxaa uu muhiim u yahay si habboon u shaqeynta nidaamyada deegaanka iyo cunnada oo dhan.

ABUURID MACQUUL AH

Beeridda ubaxyo kala duwan oo ubxiya qeybo kala duwan oo xilliga ah waxay caawisaa ballaarinta isha cuntada ee caawiyeyaasha mira dhalka geedaha. Waa kuwan tusaalooyin dhir ah oo aad beeran karto si beertaadu u ubxiso xilliga oo dhan oo ay u taageerto caawiyeyaasha mira dhalka geedaha :

XILLIGA HORE :

- Columbine (*aquilegia canadensis*)
 - wuxuu soo jiitaa hummingbirds, balambaalista iyo moths
- Mountain Mint (*Pycnanthemum spp.*)
 - wuxuu soo jiiraa shinnida, balambaalista, doorshaanka iyo xoonka
- Wild Lupine (*Lupinus Perennis*)
 - wuxuu soo jiitaa shinnida, balambaalista iyo moths
 - geedka ay ka dul baxaa Karner Blue iyo Persius Duskywing caterpillars, oo noqda Karner Blue iyo Persius Duskywing butterflies, sidaasi ay isugu xigaan.

BARTAMAHA XILLIGA

- Anise Hyssop (*agastache foeniculum*)
 - wuxuu soo jiitaa xoonka noolaha kale ku dul noolaada ee cuna cayayaanka beerta jooga
- Milkweeds (*asclepias spp.*)
 - waa geedka ay ku dul dagaan balambaalista nooca boqortooyada
- Joe Pye Weed (*eutro chium spp.*)
 - wuxuu soo jiitaa balambaalista sida nooca swallowtails

QEYBTA DAMBE EE XILLIGA

- Asters (*Symphyotrichum iyo Eurybia*)
 - wuxuu soo jiitaa shinnida, balambaalista iyo moths
- Goldenrods (*Solidago iyo Euthamia spp.*)
 - wuxuu soo jiitaa shinnida, balambaalista iyo shimbiraha



HABDHAQANNADA UGU WANAAGSAN

- **GEEDAHA ASALIGA:** isticmaalka geedaha asaliga ah ee ay isla soo baxeen geedo kale oo asali ah iyo xayawaano. Geedaha asaliga ah waxaa lagu dhafaa shabakadaha cunnada maxalliga ah waxayna aad ula qabsadaan cimilada maxalliga ah. Tan macnaheedu waa waxay bixiyaan cunno badan, aad ayay kuwa kale uga adkaysi badan yihiin, waxayna u baahan yihiin ilaalin yar marka loo barbar dhigo noocyada dib laga keenay deegaanka.
- **KALA DUWANAANTA UBAXYADA:** Abuur noocyada kala duwan oo geedo ah oo waqtiyo kala duwan oo xiliga wax abuuridda ah ubxiya si ay u siiyaan ilo cunno oo wax ku ool ah caawiyeyaasha mira dhalka geedaha. Dhirta leh cabbirka ubaxyada, qaababka, iyo midabada kala duwan waxay soo jiidan karaan noocyada baahiyaha kala duwan waxayna u badan tahay inay iska caabiyaan cayayaanka iyo cudurada.
- **HOY:** Ku dar dhirta iyo sifooyinka kale ee deegaanka si loo siiyo caawiyayaasha mira dhalka geedaha meelo ammaan ah oo ay ku nastaan, ku tarmaan, uguna gaashaantaan cimilada xun. Caws dhaadheer, qashin caleen ah, geedo muddo dheer baxa oo alwaax leh, geedo yaryar salalkooda oo la jaray, sanduuqyo shinni iyo kuwo shimbiro, iyo ciid dabacsan oo caafimaad qabta ayaa dhamaantood hoy u ah noocyada kala duwan ee caawiyeyaasha mira dhalka geedaha. Goobo leh barkado yaryar oo biyo waxay siiyaan caawiyeyaasha mira dhalka geedaha goobo badbaado leh oo jirkooda dhacaan uu kusoo galo.



Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden

TALOYINKA DHAWRIDDA

- U waraabi geedaha si joogto ah inta lagu jiro xilliga hore ee wax beeridda
- Waxaan u baahan nahay inaad si joogto ah wax u qorsheyno labada sano ee ugu horreysa si geedaha asaliga ah loogu caawiyo inay tartanka uga badiyaan geedaha aan loo baahnayn
- Ku dad geedaha mudada dheer baxa salkooda geedo qallalay si geedaha aan loo baahnayn loo cadaadiyo oo ku dar walax organik ah carrada
- Ku dhaaf walxaha dhirta quruntay ah iyo caleenta meesha ku gadaaman si aad u siiso caawiyayaasha mira dhalka geedaha meel ay ku jiraan inta xilliga jiilaalku ka dhammaanayo
- Yaree isticmaalka sunta cayayaanka iyo sunta lagula dagaallamo geedaha aanan loo baahnayn maadaama ay badanaa dilaan noocyada geedaha ah ee waxyeellada leh iyo kuwa faaiidada leh intaba.



GrowBoston

growboston@boston.gov

Isha xogtaan laga soo qaatay waa: NYC Parks GreenThumb, Cornell Cooperative Extension, Butterfly Project NYC, University of California Agriculture and Natural Resources, United States Department of Agriculture NRCS

